



Adeegyada Turjumaada

Xafiiska Adeegyada Turjumaanka

Saacadaha: Isniin – Jimco, 8:30 subaxnimo – 5:00 galabnimo

Taleefanka: 206.606.6419

limaylka: interpreter@fredhutch.org

Ama Evelyn Guerra ee eguerra@fredhutch.org

Bixinta Turjumaano Caafimaad oo Takhasus leh

Haddaan nahay Xarunta Kansarka ee Fred Hutchinson, waxaanu aaminsanahay in sinaanta daryeelka caafimaadku ay aad muhiim u tahay. Mid ka mid ah dariiqooyinka aan ku caawin karno dadka inay helaan daryeel waa in aan helno turjumaano bilaash ah bukaannadayada haddii Ingiriisigu aanu ahayn luqaddaada koowaad ama haddii aad tahay dhegool ama maqal adag.

Waan ognahay in adiga iyo dhakhtarkaagu aad u baahan tihiin inaad wada xidhiidhi kartaan. Taasi waa sababta aan u bixino helista turjumaano caafimaad oo u qalma in ka badan 100 luqadood, telefoon ahaan, muuqaal ama qof ahaan dhammaan goobaha Fred Hutch. Tani waa adeeg bilaash ah oo aan kharash lahayn oo loogu talagalay bukaannadayada.

Wac 911 haddii aad xaalad degdeg ah ay ku haysato oo aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah.

Sideen u Weydiisan karaa Turjumaan oo ku aadan Ballantayda Fred Hutch?

Fadlan nala soo socodsii haddii aad u baahato turjumaan ballantaada rugta Fred Hutch. Waxaan u heli karnaa turjumaan bukaanka ama xubnaha qoyska ee aan ku hadlin Ingiriisiga.

Sidee buu Turjumaanku ugu soo biirayaa Ballantayda?

Balamaha Gudaha rugta caafimaadka:

Haddii aad hore bukaan uga ahayd Fred Hutch, si toos ah ayaa laguugu meelayn doonaa turjumaan iyadoo lagu salaynayo macluumaadka aad ku bixisay diiwaangelinta. Waxa lagugu meelayn doonaa turjumaan mid ka mid ah saddexdan qaabood:

- Shaqsi ahaan - turjumaanka ayaa qolka kula jooga xiliga ballantaada
- Taleefan ahaan - turjumaanka ayaa ballanta uga soo biiraya telefoonka
- Wicitaan muuqaal ah - turjumaanka wuxuu ballanka ugu soo biirayaa muuqaal ahaan (oo la mid ah FaceTime ama WhatsApp), laakiin ammaan ah

Balamaha Telehealth:

Turjumaan ayaa lagu soo dari karaa wacitaanka Zoom ee dhakhtarkaaga markaad leedahay ballan Telehealth ah.

Sideen ugu waci karaa Fred Hutch aniga oo wata Turjumaan Taleefanka ah?

Haddii aad u baahan tahay inaad wacdo Fred Hutch oo aad talefoonka kula hadasho turjumaan, oo aad ku hadasho Kuuriyaan, Mandarin, Ruush, Isbaanish ama Fiyatnaamiis:

- Wac [855.670.9798](tel:855.670.9798) oo dhegayso luqadaada (tusaale, "wac '1' ee Isbaanishka")
- Raac tilmaamaha aad maqashid

Haddii aad u baahan tahay inaad wacdo Fred Hutch oo aad talefoonka kula hadasho turjumaan, oo aad ku hadasho luqad aan ahayn Kuuriyaan, Mandarin, Ruush, Isbaanish ama Fiyatnaamiis:

- Wac lambarka ay ku siisay kalkaaliyahaaga ama adeeg bixiyaha ama garaac [855.557.0555](tel:855.557.0555) iyo marka la soo dajiyo, garaac "0" si aad u gaadho hawlwadeenka
- Ingriiska ku dheh "turjumaan"
- Ku dheh luqadda aad u baahan tahay
- Turjumaan ayaa ku soo biiri doona wacitaanka

Waxaan ahay dhagool ama qof maqalka adag. Sideen ku heli karaa turjumaan?

Waxaan la shaqaynaa wakaaladaha maxaliga ah si aan qof ahaan u turjumaano bukaanada dhegaha la' ama maqalka adag. Waxaan sidoo kale ku samayn karnaa turjumaada fog ee wacitaanka fiidiyowga.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan turjumaanka bukaanada dhegaha la' ama maqalka adag, ka wac Xafiiska Adeegyada Turjumaanka ee ah 206.606.6419.